


MAALINTA WADANIYAYNTA

WAXAAD FILAYSO

Imaatinka ka dib, waxaad sii maraysaa 6 goobood:



U diyaar garow sugitaan mudo dheer qaata

WASHINGTON NEW AMERICANS, barnaamijka OneAmerica, wuxuu dhiiri galiyaa guusha isdhexgalka muhaajiriinta iyagoo isku xiraaya Dadka Sharciga ku jooga (LPRs) warbixinta iyo adeegyada ay u baahan yihiin si ay ugu guulaystaan helida sharciga muwaadinimada iyo una noqdaan xubno firfircoon ee dadwaynaheena.

ONEAMERICA waxay u aaminsan tahay aragtida ku aadan qaran midaysan, kaasi oo dhiirgaliya is dhexgal guule ee muhaajiriinta iyagoo ku xidhaaya Sharciga Deganaanshaha ee Rasmiga ah wararka iyo taageerada ay u baahan yihiin si ay si guule u xiigsadaan wadanimada xubno firfircoona uga noqdaan bulshada.

AMERICAN IMMIGRATION LAWYERS ASSOCIATION (Dallada Garyaqaanada Arimaha Socdaalka) waa ururka qaranka ee qareenada waaxda socdaalka ee loo aasaasay inay u olaleeyaan cadaalada, una doodaan sharcig socdaal oo wanaagsan aqli galna ah, iyo horu socod siinta qiimaha uu leeyahay socdaalku iyo sharciga wadanimada iyo sida loogu dhaqmo.

WAXANAGALA QAYB QAATEY

American Immigration Lawyers Association, WA Chapter
Asian Counseling and Referral Service
Chinese Information and Service Center
City of Seattle
Columbia Basin College
Davis Wright Tremaine
El Mundo News
Garvey Schubert Barer
Grupo CAFE
Kitsap Immigrant Assistance Center
La Casa Hogar
Lutheran Community Services Northwest

Movimiento Estudiantil Chican@ Aztlán (MEChA)
National Partnership for New Americans
New Americans Campaign
Northwest Immigrant Asset-Building Initiative
Northwest Immigrant Rights Project
OneAmerica
Renton Technical College
Soreff Law
Tacoma Community House
Washington Defenders Association
Washington State Labor Council
Wenatchee Valley College
Yakima Valley Community College

NOQO MUWAADIN

Ma u Baahan Tahay Caawimaad?

Kaalay Maalinta Waddaniyadda oo looyarro aqoon u leh dhinaca Socdaalka iyo turjumaanno ay si lacag la'aan ah kaaga caawini doonaan buuxinta waraaqaha lagu noqdo muwaadin ama sitisan.

TAARIKHDA: Sabtida, Sabtember 23, 2017

GOORTA: 10 ka Subaxnimo – 1 da Galabnimo

LACAG: Lacag la'aan

GOOBTA:

PASCO

Columbia Basin College
Center for Career & Technical
Education

Corner of W. Argent Rd &
Saraceno Way
Pasco, WA 99301

RENTON

Renton Technical College
Building C
3000 NE 4th St.
Renton, WA 98056

WENATCHEE
Wenatchee Valley College
Wenatchi Hall
1300 5th St.
Wenatchee, WA 98801

Wararka dheeraadka ee ku saabsan Maalinta Muwaadinimada ama aad isku diiwaan geliso ka caawinta muwaadinimada ee hore, kala xiriir taleefankan:

(206) 926-3924 ama

www.wanewamericans.org

WAXAA IDIIN SOO GUDBIYAY



SI AAD U QALANTO, WAXAAD U BAAHAN TAHAY:

- Waa inuu jiraa ugu yaraan 18 sano laga bilaabo maalintaad buuxiso.
- Haystay deganaasha rasmiga ah (Green Card) ugu yaraan shan sano ama sadex sanadood hadii uu qabo xaas Maraykan ah.
- Ku sugnaa gudaha Maraykanka 2.5 sanadood ee shantii sano ee ugu danbeeyey ama 1.5 sadexdii sano ee ugu danbeeyey haduu qabo xaas Maraykan ah. Waa inaanu ku sugnaa sanad ama ka badan dibada Maraykanka shantii sano ee ugu danbeeyey ama sadexdii sano ee ugu danbeeyey haduu qabo xaas Maraykan ah.

Waxa Lagaa Rabo Maalinta Wumaadinimada

QOFKASTA

- Deganaansha rasmiga ah (Green Card)
- Cinwaanada guryihii aad deganayd shantii sanadood ee ugu danbeeyey
- Magaca iyo cinwaanada meelihii aad ka shaqaysay shantii sano ee ugu danbaysay
- Hadaad dhooftay intaad haysatey degaanshaha rasmiga ah, dalalkii aad tagtey iyo mudooyinkaad ku sugnayd. Baasaboorkii aad ku dhooftay iyo tikadhadii aad goosatey, hadaad heli karo soo qaado.
- Magacyada caruurtaada, taariikhda dhalashada iyo lambarada kaadhahkooda degaanshaha rasmiga ah (Green Card)
- Waraaqaha canshuur celinta ee ugu danbeeyey
- Keenso wixii dokumentiyo ah oo ku saabsan waaxda imigareeshinka
- 725 doolar (dadka qaar waxa laga yaaba in laga dhimo) lacag cadaana ama jeeg ku socda "U.S. Department of Homeland Security".
- Turjumaano waa diyaar, hadii aad adigu soo kaxaysatona ma xuma

AQOONSIYO KALE OO DHEERAAD AH

- **Hadii aad caawimaad ka heshid doowlada sida caafimaad, foodstamp, Ama sooshaal sekuuriti la imoow waraaqaha cadeeynaya.**
- **Hadii aad xasbi gashay, boolis ku qabtey ama maxkamad lagu hor keenay shantii sano ee ugu danbeeyey, waa inaad keentaa:**
 - Waraaqahii iyo cadaymihii la xidhiidhey xadhigaaga (warbixintii booliska iyo waraaqdii maxkamada).
- **Hadii magacaaga degaanshaha rasmiga (Green Card) ahi ka duwanyahay kaaga sharciga ah (sharciga kuugu qoran):**
 - Waa inaad keentaa wax cadaynaya inaad magacaaga badashey (Warqada guurka, furiinka, shahaado jaamacadeed ama cadayn maxkamadeed).
- **Hadaad ku dalbatey jinsiyada xaaskaaga Maraykanka ah:**
 - Taariikhda guur ee xaaskaaga ama ninkaaga, guurkiisee/ guurkeedii la soo dhaafay.
 - Wax cadaynaya in adiga iyo xaaskaagu meel kuwada nooshihiin (sida warqadaha cashuur celinta, bankiga, shahaadada dhalashada caruurta).

■ Hadaad guursatey marar badan, waa inaad keentaa:

- Waraaqdii guurka, furiinka ama dhimasho iyo dhamaan taariikhihii guurkaasi dhacay.
- Cadayn inaad bixisay lacagta daryeelka ubadka oo maxkamadu kugu xukuntey, haday jiraan.

■ Hadii aad Maraykanka dibada uga maqnaayd inka badan 6 billood sanadkasta oo ka timada intii aad qaadatay degaanshaha rasmiga ah:

- Waa inaad keentaa cadayn ku saabsan maalintii aad ka baxday iyo maalintaad ku soo noqotay Maraykanka iyo inaad shaqo haysay ama gurigaad degenayd Maraykanka.



wixii warar dheeraad ah fariin ahaan kalmada citizen telefanka (206) 926-3924 ugu dir

SU'AALO?

Wararka dheeraadka ee ku saabsan Maalinta Muwaadinimada ama aad isku diiwaan geliso ka caawinta muwaadinimada ee hore, kala xiriir taleefankan:

(206) 926-3924 ama

www.wanewamericans.org

■ Hadii xaas iyo caruur aan kula noolayn jiraan, waa inaad keentaa:

- Cadayn maxkamad kugu amartey bixinta daryeelka caruurta.
- Cadayn taageero dhaqaale oo aad siiso caruurtaada, sida jeega daba-diisa, rasiido (shati) lacag lagaaga gooyey caruurta ama warqada ka socota waalid ama qof kuu haya caruurta.
- **Hadii cashuur dawlada kugu leedahay oo aanad bixin, waa inaad keentaa:**
 - Dhamaan waraaqaha iyo codsiyada aad ka heshey dawlada ee arintaas la xidhiidha.

■ Hadii magacaagu ku jiro liiska shaqada qaranka Maraykanka (Selective Service), waxa lagaaga baahanyahay:

- Taariikhdii aad is diiwaan galisay iyo labarkaaga shaqada qaran.

